AUSCO

Barnaamijka Tilmaan-siinta Dhaqaneed ee Australia

# Sharciyada Australia

Akharinta Fudud



Australia waa mujtamac dhaqano-badan.



Taas macnaheedu waa dadka ku nool Australia waxay ka kala yimaadeen:

- dhaqamo kala duwan
- diimo kala duwan



Halkan Australian waxaad xaq u leedahay inaad iskaa ugu noolaato:

- dhaqankaaga
- caqiidooyinkaaga



Dadka Australia waxay leeyihiin:

- qiyamka guud – waxyaalaha ay dhammaan dadka Australia rumaysan yihiin waa muhiim



- xeerarka – sida dadka Australia u arkaan in dadku u falgalaan ama u dhaqmaan




Waxay ku wada nool yihiin isla shuruuc.



Qof kastaa waa inuu qabtaa waxay awoodaan inay ku taageeri karaan hab nololeedka Australia.



Qiyamka ay dadka Australia wadaagaan waxaa ka mid ah:

- xoriyadda hadalka – waxaad oran kartaa waxaad u malaynayso, dareemayso ama rumaysan tahay



- xoriyadda urur-samaynta – waxaad dooran kartaa qofkaad waqtiga la qaadan karto



- xoriyadda isku-imaadka – dadku way iskugu tegi karaan sababo ayaga u gaar ah



- xoriyadda diinta



- xoriyadda dhaqdhaqaaqa – waxaad aadi kartaa halkaad doonayso oo Australia ah



- ixtiraamka loo hayo xoriyadda iyo sharafta shaqsiga – dadku waxay xaq leeyihiin xoriyad iyo madaxbanaani



- ballanqaadka xukunka sharciga – raac waxa sharcigu oranayo



- diimoqaraadiyadda baarlamaanka – dadku waxay doortaan Dowladda ay doonayaan



- fursadaha loo siman yahay ee shaqsiyaadka, ayadoon loo eegayn
    - jinsiga
    - waddankii aad ka timid
    - diinta
    - asalka qawmiyada



- aqbalidda kala-duwanaanta dhaqannada – dadka ka soo kala-jeeda dhaqannada oo dhan waa la ogol yahay



- Xamaasadda sinnaanta taas
    - rumaysan is-ixtiraamka loo dhan yahay – dadku waxay isula dhaqmaan siday rabaan in loola dhaqmo
    - caddaallada
    - naxariista kuwa u baahan – daryeelidda iyo caawinta dadka kale

# La-macaamilidda saraakiisha dowladda



Markii aad Australia timaaddo, waxaad la tacaamulaysaa dad kuwaas oo ka shaqeeya adeegyada dowlada.




Dadkaas ka shaqeeya adeegyada dowladda waxay raacaan xeerar adag oo ku saabsan siday u qabtaan shaqadooda.




Waxay u baahan yihiin inay noqdaan:

- caddaallad
- xirfad-yaqaano



Waa wax sharci-darro ah in la siiyo lacag dadka ka shaqeeya adeegyada dowladda ama haddiyado si aad u hesho adeegyo wacan.

# Booliiska Australia



Booliiska halkan Australia waxay u shaqeeyaan Dowladda.




Shaqadoodu waxay tahay inay:

- ilaaliyaan nabad-gelyada




- horumariyaan ammaanka bulshada dhexdeeda



- joojiyaan danbiyad inay dhacaan




- ka-shqeeyaan wixii dhacay markii danbi dhaco



- ilaaliyaan nolosha dadka




- hubiyaan in dadku raacaan wixii sharcigu sheegayo



Booliiska (Australian Federal Police) waa booliiska qaranka.



Dowlad-goboleed iyo taritori kastaa waxay leedahay xoogga booliiska ugaar ah.



Booliiska Australia qayb kama ahan militariga ama ciidamada difaaca.



Waa inaadan ka cabsan booliiska halkan Australia.



Waxaad u baahan tahay inaad:

- ixtiraamto booliiska



- dhegaysato waxay kuu sheegayaan




- samayso waxay sheegayaan

# Sharciyada Australia



Sharciyada Australia waxaa loo sameeye:

- muwaadiniinta – Australia waa waddankooda
- daganayaasha – dadka ku nool Australia hase ahaatee aan ahayn muwaadiniinta Australia



Nadaamka caddaaladdu halkan Australia waa mid ka madaxbannaan Dowladda.



Sharciyada Australia waxay kaa caawiyaan inay ammaan siiyaan adiga iyo qoyskaaga.




Waxaad u baahan tahay inaad fahamto sida sharciyada Australia u khuseeyaan adiga iyo qoyskaaga.




Ogaanshaha sharciyada asaasiga qaarkood waxay kaa caawin doonaan inaad la qabsato noloshaada cusub halkan Australia.




Haddii ay qabto wax su'aalo ah oo ku saabsan sharciyada Australia, weydii garwadeenkaaga ama qofkii ku isboonsaray.

# Sinnaanta iyo sharciga




Halkan Australia dhammaan dadku way u siman yihiin sharciga hortiisa.



Dhammaan dadka Australia waxay leeyihiin xaqa in:

- la ixtiraamo



- in loola dhaqmo
  - si caddaallad ah
  - sinnaan ah



Laguulama dhaqmi karo si ka duwan dadka kale sababtoo ah:

- jinsigooda



- cunsurka ama itnikada



- waddanka aad ka timid



- da’dooda




- xaalladda guurkooda



- uurkooda




- citiqaadyada siyaasadeed



- citiqaadyada diimeed



- iintooda



- qaabka galmadooda



Taasi waxay khuseysaa:

- shaqo-siinta – shaqo-helidda iyo shaqooyinka




- waxbarashada



- hooyga – gurisiinta iyo goobaha lagu nool yahay



- diinta



- gadashada badeecadaha




- adeegsiga adeegyada sida dhaqaatiirta, bangiyada iyo hoteelada



- haddii ay ku xiraan ama ku qabtaan saraakiisha booliiska Federaalka ama kuwa dowlad-goboleedka

## Diinta iyo sharciga



Australia malahan diin rasmi ah ama diin dowladeed.



Dhammaan dadka reer Australia waxay xor u yihiin inay qaataan diintii kasta oo ay doonaan.


Qaar ka mid ah diimahaas waxaa ka mid ah:



- Kirishtaanka



- Buudisimka



- Islaamka



- Yuhuudda



- Hinduuga



Waxaad ku dhaqmi kartaa caadooyinka diimeed ama xusaska maaddaama aysan jebinayn sharciga.

Sharciyada diineed laguma aqoonsana sharciga Australia.


Mana lahan wax maqaam sharciyeed ah.

# Rabshadda iyo sharciga

Waxay ka soo horjeedaa sharciga inaad rabshoole ku noqoto:



- ragga




- haweenka



- carruurta



- xubnaha qoyska




Taasna waxaa loo yaqaan gacan-qaad.

Gacan-qaadku waa danbi jariimo ah.



Waxaa lagugu ciqaabi karaa haddii aad u gacanqaado cid kale.

# Rabshad guriyeedka iyo qoyseed




Rabshad guriyeedka ama qoyseedka waa markii rabshaddu ka dhex-dhacdo:

- xubnaha qoyska



- dadka is-qaba ama leh xiriir dhow




Dowladda Australia ma ogola rabshad guriyeedka ama qoyseedka.




Ahow nin ama haween, rabshad guriyeedka ama qoyseedka waa danbi.

Waxay ka soo-horjeedaan sharciga.



Xabsi ayaad ku geli kartaa rabshad guriyeedka ama qoyseedka.



Rabshad guriyeedka ama qoyseedka waxay ku dhici kartaa:

- wadeyga



- carruurta



- hantida



Waxaana ka mid ah:

- samaynta hanjabaadda
- isku-dayga in la kontaroolo cid kale
- cabsi-gelinta cid kale



- halis-gelinta ammaanka iyo fayoobidda cid kale



- udiidda cid kale inay helaan lacagta ay u baahan yihiin



- ku-dhihidda wax xun ama waxyaalo liita cid kale



- ka-fogaynta cid kale saaxiibadooda ama qoyskooda



- dhaawac ugaysi cid kale si gacan-qaad jidheed ah



Waxaa ka jira  Australia adeegyo kaa caawin kara haddii aad rabshad gasho.



Way fahmi karaan siday wax noqon karaan marka loo eego dhaqankaaga.



Waxaad ka heli kartaa macluumaad dheeraad ah website-ka 1800RESPECT.
[www.1800respect.org.au](http://www.1800respect.org.au)

# Ku-xadgudubka galamada



Ku-xadgudubka galmada waa:

- dhaawicidda qof kale si galmo ah
- ku qasbidda cid kale inay sameeyaan waxyaalo galmo ah oo aysan doonayn inay sameeyaan



Ku-xadgudubka galmada waxaa ka mid ah:


- qabsashada (xoogidda) – ku qasbidda cid kale inay galmo sameeyaan
- ku-qasbidda cid kale inay sameeyaan fal galmo oo aysan doonayn inay sameeyaan
- ku-qasbidda cid kale inay daawadaan ama ka qaybqaataan pornography
- ku-qasbidda carruurta inay ka-qaybgalaan fal galmeed




Ku-xadgudubka galmadu waa sharci-darro.



Weli waa sharci-darro xataa haddii ay tahay sowjkaaga ama wadeygaaga.



Haddii aad ku kacdo ku-xadgudubka galmeed waxaad gelaysaa xabsiga.



Waxaa ka jira adeegyo halkan Australia oo ku caawin kara.

Waxay xasaasi ku yihiin dhaqankaaga.



Waxaad ka heli kartaa macluumaad dheeraad ah website-ka 1800Respect.
[www.1800respect.org.au](http://www.1800respect.org.au)

## Ku-xadgudbidda ilmaha iyo sharciga





Sharciyada Australia waxay carruurta ka ilaaliyaan:

- rabshadda
- xadgudubka




Kuwan waxaa ka mid ah:

- xadgudubka jidheed
- xadgudubka dhimireed ama caadifadeed
- xadgudubka galmoodka




Kuwaasi dhammaantood waa danbiyo daran halkan Australia.



Ilmaha waa laga qaadi karaa qoyskooda haddii lagu xadgudbo.



Dowladda ayaa gayn doonta meel halkaas oo ammaan ku yihiin.



Sharcigu wuxuu sheegayaa in dadku u baahan yihiin inay booliiska usheegaan haddii ay u malaynayaan in ilmaha lagu xadgudbo.



Halkan Australia ma dili kartid ilmahaaga.

Waxaa muhiim ah inaad barato sida loo toosiyo carruurta ayadoon la adeegsanayn rabshad.



Waxaa jira dad kuwaas oo kaa caawin kara inaad daryeesho carruurtaada.

- qoyska




- saaxiibada



- xaruumaha bulshada



- adeegyada Childcare-ka




Waxaad ka heli kartaa macluumaad iyo talooyin ku saabsan waalidnimada:

- degmooyinka hoose (Degaanada)




- shaqaalaha bulshada



- la-taliyeyaasha



- kindhada



- dugsiyada



- intarneedka



Waxaad ka heli kartaa macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan waalidnimada website-ka (Australian Institute of Family Studies). www.aifs.gov.au



Ku-daryeelidda carruurta gurigaaga dhexdiisa waa wax muhiim ah oo aad u baahan tahay.

Waa masuuliyaddaada.



Ma jiro wax sharci ah oo sheegaya da'da uu jirayo ilmahu ka hor intaadan uga tegin guriga ayaga kaliya.



Waxaad u baahan tahay inaad hubiso in carruurtaadu ammaan yihiin.

# Mindiyaha, hubka iyo sharciga




Australia waxay leedahay xeerar adag oo ku saabsan cidda lahaan karta qoryaha ama hubka kale




Waxaad u baahan tahay laysan haddii aad doonayso inaad lahaato qori.



Dadku waxay mindiyaha u arkaan inay yihiin hub qatar ah. Waana ka sharci-darro in lagu haysto goobaha dadweynaha.



Waxaa jira sharciyo kala duwan oo dowlad-goboleed iyo taritori kasta ka jira.



Waxaad ka heli kartaa macluumaad dheeraad ah website-ka Waaxda Xeer-ilaaliyaha Guud (Attorney-General's Department).
www.ag.gov.au

# Guurka iyo sharciga



Dadka Australia waa u xor inay doortaan haddii ay guursanayaan.




Waxaad u baahan tahay inaad ka weyn tahay 18 sano si aad uguursato.



Haddii aad ka yar tahay18 sano maxkamad ayaa go’aamin doonta inaad guursan karto.

Waxaad u baahan tahay inaad haysato sabab wanaagsan.



Waa sharci-darro in la yeesho wax ka badan hal nin ama hal naag isla mar qura.

Taasna waxaa loo yaqaan:

- naago-badan-guursasho
- naago-badan-guursasho



Mar labaad waad guursan kartaa haddii aad:

- carmalo tahay – ninkaagii ama xaaskaagii haddii uu dhinto




- la-furay – maxkamadda ayaa sheegtay in guurkaagii dhammaaday



Qofku waa inuu ogolaadaa in la guursado.

Cidna kuma qasbi kartid ama kuma khayaani kartid.



Waa wax sharci-darro ah halkan Australia in:

- qof lagu qasbo inuu guursado



- qof loo qaado ama loo diro waddan kale guur qasab ah awgeed



Guurka laysku-doono waa ka sharci halkan Australia.




Halkan Australia bixinta yaradka maahan wax badanaa dadka Australia sameeyaan.




Waxaa jira adeegyo halkan Australia oo ku caawin kara haddii aad dhibaato gasho.

Waa wax xasaasi ka ah dhaankaaga.



Waxaad ka heli kartaa macluumaad dheeraad ah website-ka 1800Respect.
[www.1800respect.org.au](http://www.1800respect.org.au)

## Galmada iyo sharciga



Halkan Australia waa in ogolaansho ama raalinimo jirtaa ka hor intaadan galmo la qaadan qof kale – waxay u baahan yihiin inay yiraahdaan waa ok.




Dowlad-goboleed kastaa waxay leedahay Da'da sharciyeed ee Ogolaanshaha – da'da uu jirayo qof ka hor inta aanu samayn galmo.




Da'da ogolaanshaha ee badiba dowlad-goboleedyada waa 16 sano jir.




Sharcigu wuu khuseeyaa labka iyo dheddigaba.




Waxaa jira ciqaabo culus oo lagu qaadayo cid kasta oo la-yeelata fal galmo qof ka yar da'da ogolaanshaha.

# Sigaar-cabidda iyo sharciga



Halkan Australia, sigaar-cabidda waa ka mamnuuc goobaha dadweynaha, ay ka midka yihiin:



- garoomada



- xafiisyada dowladda



- goobaha-Shaqo-helidda



- xaruumaha dukaamaysiga




- maqaayadaha iyo kafeeyada




- baabyada, baararka iyo naadiyada habeenkii



Waxaa jiri doona calaamado muujinaya meelaha aadan sigaarka ku cabi karin.




Dowlad-goboleedyada qaarkood waa wax sharci-darro ah in sigaar lagu cabo baabuurka dhexdiisa haddii ay carruur kugula jiraan.




Waa wax sharci-darro ah in laga iibiyo sigaarada ama waxyaalaha tubaakada cid ka dhalin-yar 18.

Siinta sigaarada ama waxyaalaha tubaakada ah qof ka yar 18 waa sharci-darro badiba dowlad-goboleedyada.



Waxaad macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan sigaar-cabidda website-ka Quitnow.
www.quitnow.gov.au

# Cabidda khamriga iyo sharciga




Halkan Australia sharcigu waa la ogol yahay in la cabbo khamri hase ahaatee keliya:

- goobaha qaarkood
- waqtiyada qaarkood



Cabidda ama iibinta khamriga waa ka mamnuuc badiba goobaha dadweynaha.




Waa inaad 18 sano ka weyn tahay si aad khamri u gadato.




Waa sharci-darro in khamriga laga iibiyo qof ka yar 18 sano.




Waxaad yeeli kartaa inaad siiso khamri cid ka yar 18 sano, hase ahaatee keliya gurigaaga dhexdiisa.





Caafimaad uma ahan cid ka yar 18 inay cabto khamriga.




Waxaad ka heli kartaa macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan cabidda website-ka Wasaaradda Caafimaadka (Department of Health). [www.alcohol.gov.au](http://www.alcohol.gov.au)

## Daroogooyinka iyo sharciga




Daroogada ama waxyaalaha qaarkood waa ka sharci hase ahaatee waxaa jira xeerar ku saabsan:

- sida ay tahay in loo isticmaalo
- haddii la iibin karo



Daroogada ama waxyaalaha qaarkood waa sharci-darro in:


- la isticmaalo



- la-haysto



- la beero



- la sameeyo



- la iibiyo



Keenidda daroogada Australia waa danbi daran.

Waxaadna ku geli kartaa xabsi.



Sharcigu wuxuu sheegayaa in aadan baabuur wadi karin markii aad isticmaashay daroogo.



Booliiska waxay ku weydiin karaan inaad joojiso baabuurkaaga si ay kaaga baaraan haddii aad isticmaaleysey daroogada.



Waxaa jira sharciyo kala duwan oo ka jira dowlad-goboleed iyo taritori kasta.

Ciqaabaha – waxa kugu dhici kara – way kala duwan yihiin sidoo kale.



Waxaad kaloo u baahan tahay inaad taxadarto haddii aad baabuur kaxayso kadib markaad qaadatay daawo uu dhaqtar ku siiyey.



Waxaad ka heli kartaa macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan daroogada website-ka Wasaaradda Caafimaadka.
[www.drugs.health.gov.au](http://www.drugs.health.gov.au)

## Khayaanada iyo sharciga



Haddii cid ka socota Dowladda ay ku weydiiso inaad u sheegto macluumaadka ku saabsan qoyskaaga ama intay le'gtahay lacagta aad shaqaysay, waxaad u baahan tahay inaad runta u sheegto.

Taasna waxaa ka mid ah:

- Wasaaradda Adeegyada Aadamiga (Department of Human Services)
- Xafiiska canshuuraha ee Australia (Australian Taxation Office)




Haddii aad u sheegto waxyaalo aan run ahayn ama sax ahayn waxaa dhici kara ganaaxyo.




Waxaa laga yaabaa inaad:

- lumiso taageerada dakhligaaga



- dib u siiso lacagtii Dowladda

## Gaarnimada iyo Sharciga



Waxaa ka jira sharciyo halkan Australia si loo ilaaliyo gaarnimadaada.




*Sharciga Gaarnimada 1988* (*Privacy Act 1988*) wuxuu u sheegayaa haya'daha dowladda siday ula dhaqmi lahaayeen macluumaad kaaga gaarnimada.



Taasna waxaa ka mid ah sida loo:

- ilaaliyo



- adeegsado



- qaado

Haya'do badan waxay qoraan tibaaxyo sheegaya waxay ku samayn doonaan macluumaadkaaga.



Haddii aadan ku faraxsanayn habka macluumaadkaaga loo adeegsaday, waxaad la xiriiri kartaa Xafiiska Komasaariyaha Gaarnimada ee Federaalka (Office of the Federal Privacy Commissioner).



Waxaad ka heli kartaa macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan ilaalinta gaarnimadaada website-ka Xafiiska Komasaariyaha Macluumaadka ee Australia (Office of the Australian Information Commissioner's website). [www.oaic.gov.au](http://www.oaic.gov.au)

## Gargaarka Sharci (Legal Aid)



Dowladdu waxay leedahay adeeg loo yaqaan Gargaarka Sharci.



Gargaarka Sharci waxay dadka ka caawisaa arrimaha sharciga.




Adeegyada Gargaarka Sharci waa lacag la'aan.



Waxaa jira xafiisyo ku yaal dowlad-goboleed iyo taritori kasta.



Waxay ku siin karaan:

- talooyin sharciyeed



- caawimaad



- cid ku matasha haddii aadan awoodin qareenkaaga aad leedahay




Garwadeenkaaga ayaa kaa caawin kara inaad hesho Xarunta Gargaarka Sharci ee kuugu dhow.



Waxaad ka heli kartaa macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan Gargaarka Sharci website-ka Dowladda Australia.
www.australia.gov.au/content/legal-aid

Australian Government
Department of Social Services

Oo ay bixisay Haya'dda Caalamiga ee Socdaalka ayadoo ka wakiila Wasaaradda Australia ee Adeegyada Bulshada

IOM • OIM